

Seattle Community

Police Commission Guddiga Boliiska Bulshada Seattle

Magaaladena, Ammaankena, Boliiskena, Waan isku fiicanahay!

Bilowga Qaboobaha 2013

Isku xeridda bulshadana iyo Waaxda Boliiska Seattle

Toogashadii ay geysteen boliiska Seattle sannadkii 2010 ee ka dambeysay dhimashada najaarka John T. Williams, iyo taxane ka kooban dhacdooyinka kale ee culus, kuna lug leeyahin boliiska iyo dadka midabeysan, waxay dadweynaha ku abuurtay murugo ku saabsan sida xaddhaafka leh ee loo adeegsado xoogga iyo eexda Waaxda Boliiska Seattle (SPD). Kaddib marka federaalka sameyay baaritaan, Magaalada Seattle waxay heshiis la gashay Waaxda Caddaaladda Mareykanka (Department of Justice) (DOJ) si wax looga baddalo dhaqanka SPD. Warqadda afgarashada ay isla gaareen ayaa tafatirta shaqada loo baahan yahay in la sameeyo iyo waxay ammar ku bixisay in la abuurro Guddiga Boliiska Bulshada Seattle (CPC) si bulshada ay fikrad uga dhiibato habka baddaaladda SPD iyo talooyinka ku saabsan wax baddaaladda. Isbaddalada siyaasadda waxaa loo samayn doonaa si loo habsado in adeegyada boliiska Seattle u hoggaansamaan Dastuurka, iyo sharciyada Washington iyo Mareykanka. Isbaddalada lagu talliyay ee la xariira dhaqanka boliiska waxaa sii dheer in CPC qiimeyn doonto baahida loo qabo in la hagaajiyo nidaamka la-xisaabtanka boliiska Magaalada iyo in laga shaqeeyo horumarinta kalsoonida dadweynaha ku qabaan SPD.

CPC waxay si balaaran ula xariirtaa dadka Seattle si ay uga hadlaan baddaaladda loo baahan yahay. Bishii Oktoobar, 2013, shirar lagu qabtay magaalada oo idil oo lala yeeshay dadka daggan Seattle, CPC waxay rabtay in ay ogaato inta ay ku qaadan doonto si loo hagaajiyo kalsoonida iyo xushmadda ka dhexeyso bulshada iyo SPD, iyo in ay fahamto sida SPD u hagaajin karto xariirka ay la leedahay xubnaha bulshada. CPC waxay kaloo rabtaa in ay wax ka barato haddii talooyinka siyaasadda ee la tixgeliyo yahiin kuwo macquul ah iyo haddii loo baahan yahay in isbaddal lagu sameeyo.

Xubnaha CPC:

Claudia D'Allegri
Lisa Daugaard, Co-Chair
Bill Hobson
Jay Hollingsworth
Kate Joncas
Joseph Kessler
Diane Narasaki, Co-Chair
Tina Podlodowski
Marcel Purnell
Jennifer Shaw
Kevin Stuckey
Rev. Harriett Walden
Rev. Aaron Williams
(Iminka waxaa jira labo boos
oo ka banaan bulshada)



Guddomiyeyaasha

CPC waxay ka kooban tahay 15 xubin uu soo magacaabay Duqa, waxaana ogolaaday Guddiga Magaalada. Xubnaha waxay mattalaan kala duwanaanta Seattle, waxaana ku jira dad ka socda bulshada midabeysan, bulshada jinsiyadda iyo diinta, bulshada muhaajiriinta, bulshada magaalada Hindida, bulshada bulshada dumarka damca dumarka kale (lesbian), ragga damca ragga kale (gay), kuwa labadaba ah (bisexual), kuwa aan si cad loo aqoonsan karin waxay ay

yahiin (transgender), u doodeyaasha xuquuqda madaniga, bulshada ganacsatada, shakhsiyaadka la socda dhibaata ay la kulmaan dadka madaxa ka jiran ama kuwa ku xadgudba mukhaadaraadka, iyo dhalinta. Hal xubin wuxuu ka socdaa Ururka Sarakiisha Boliiska Seattle (Seattle Police Officers Guild) iyo hal wuxuu ka socdaa Ururka Maamulka Boliiska Seattle (Seattle Police Management Association). Xubnaha CPS waxay ku nool yahiin waxayna ka shaqeeyaan dhamaan shanta xaafadaha boliiska Seattle.

Caqliadada muhiimka ah ee ku saabsan shaqada CPC ka qabato bulshada

- Hoggaanka iskaashiga

Dhamaan waxaan qabnaa dhibaato iyo xalkeeda

- Ka qeybgelin macno leh
CPC waxaa xogogaal ka dhiga fikradda ay ka hesho bulshada

- Ka qeybgelinta
Ka qeybgelinta dhamaan inta daneyso

- Xisaabtan iyo Iftiimin
(Accountability and Transparency)

Caddeyn in fikradaha laga dhiibto ay muhiim yahiin

Abuurista isbaddal socon doono muddo dheer

Habka baddalaadda boliiska ee iminka ka socda Seattle wuxuu bixiyaa fursad xoog badan si isbaddal aad loogu baahan yahay loogu sameyo siyaasadaha iyo dhaqanka boliiska iyo sida loo dhiso xariir wanaagsan oo dhex mara boliiska iyo bulshada ay u adeegaan.

Ka-Qeybgelinta Bulshada

Baddalaadda boliiska ee lagu guuleysto waxay ku xeran tahay fikradaha balaaran ay bulshada ka dhiibato isbaddalada la soo jeediyay ee ku saabsan siyaasadaha SPD, iyo sida SPD u hagaajin karto xariirka lala leeyahay bulshada.

Ka qeybgelinta iminka socota waa wax aad muhiim u ah. Muddada dheer, waxaan ku tiirsanahay ka-qeybgelinta bulshada - muddada gaaban, waa loo baahan yahay fikradda bulshada ee ku saabsan isbaddalada la soo jeediyay, hase ahaatee waxaan kaloo u baahanahay in aan ogaano haddii isbaddalada SPD shaqeyaan.

Muddo kaddib, fikradaha iyo wada hadalada bulshada ka dhiibato waxay kaloo horumarin doonaan kalsoonida lagu qabo SPD, xoojinta xariirka bulshada-boliiska, iyo taageerada la siiyo Waaxda Boliiska si loo habsado ammaanka dhamaan dadweynaha.

CPC waa madax banaan tahay. Ujeedadeeda waa in la habsado in la helo fikradaha dadweynaha la qabaan isbaddalada la rabo in lagu sameeyo boliiska. In la fulliyo ujeedadeeda, CPC:

- Waxay mattashaa fikradaha balaaran ee bulshada

- Waxay cilmi baaris ku sameysaa iyo waxay tixgelisaa siyaasadaha wanaagsan iyo dhaqanka waaxyada kale ee boliiska
- Waxay fiirisaa iyo waxay soo jeedisaa in isbaddal lagu sameeyo siyaasadaha SPD, aruurinta xogta, iyo waxyaabaha loo adeegsado tababarka.
- Waxay si firfircoon uga soo qeybgelisaa bulshadaha kala duwan si ay ugala hadasho iyo si ay faalo uga bixiso isbaddalada la soo jeediyay
- Waxay talooyinka bulshada ku dartaa talooyinkeeda siyaasadda ee u gaarka ah
- Waxay warbixinta bulshada gaarsiisaa dadka muhiimka ah ee ku lug leh hawsha baddalaadda

CPC waxay kaloo bulshada ogeysiin doontaa hawsha baddalaadda, iyo kaalinta bulshada ka qaadato hawsha baddalaadda. Muddo kaddib, CPC waxay sii wadi doontaa in ay bulshada ka qeybgeliso wararka ku saabsan horumarka ay gaarto SPD xagga u hoggaansamida heshiiska la gaaray.

Meelaha siyaasadda CPC quseyso iminka



Talooyinka ku saabsan siyaasadda

Guddiga
waxaa dhab
ka ah
in ay si
wanaagsan
u qabato
hawsha
boliiska iyo in
ay dhowrto
cadaaladda.



Boliis ka madax banaan eex

Baahida loo qabo isbaddalka: Dadka qaar, gaar ahaan dadka midabeysan, waxay waxyeelo dhinac u badan ka soo gaartaa xoogagga hirgelinta sharciga. Arrimaha la xariira dhaqanka sinaasho la'aanta ee ku lug leh joojinta, xeridda iyo adeegsiga xoogga waa wax murugo leh. Kiisaska qaar, waxaa dhici karto in arrintaan ka dhalato eex lagu talogalay, hase ahaatee waxay kaloo ka dhalan kartaa eex aan lagu talogelin oo ka jira nidaamyada iyo hay'adaha. Labada nooc eexda waxay boliiska ka dalbadaan in ay dadka ula dhaqmaan si ka duwan, taasoo laga yaabo in ay keento dhibaato iyo caddaalad darro.

Wareysiga Bulshada SPD 2011 wuxuu soo sheegay in boqolkiiba 63 dadka reer Seattle ee ka soo jawaabay aaminsan yahiin in soocidda isirka ay dhibaato ku ahayd Waaxda

Hawsha CPC: In ay ku talliso in isbaddal lagu sameeyo siyaasadaha, tababarka iyo kormeerka sarkaalka, iyo aruurinta xogta, baaris iyo warbixin si loo yareeyo tirada dhacdooyinka ku lug leh eexda loo bareeray iyo eexda aan loo bareerin

Adeegsiga xoogga

Baahida loo qabo isbaddalka: Sasaan ku saabsan adeegsiga xoogga aan loo baahneyn ama xad dhaafka ah waxay ahayd natiijo muhiim ah oo ka soo baxday baaritaanka DOJ ku sameysay SPD. DOJ waxay heshay sabab ay ku aaminto in adeegsiga xoogga xad dhaafka ah ahayd arrin dhinac u badan marka la soo qaado kiisaska ay ku lug leeyahiin dadka midabeysan, iyo in inta badan xoog la isticmaalay marar aan loo baahneyn ama ilaa heer aan loo baahneyn. DOJ waxay kaloo ogaatay sabab ay uga walwasho xoogga loo isticmaalay dadka madaxa ka jiran ama soo cabbay qamro ama soo qaatay mukhaadaraad. Wareysiga Bulshada

SPD 2011 waxay soo sheegtay in boqolkiiba 72 dadka reer Seattle ee ka soo jawaabay in ay aaminsan yahiin in dhibaato lagu qabo SPD xagga adeegsiga xoogga xaddhaafka ah.

Hawsha CPC: In bulshada la siiyo fursad ay faalo ka bixiso isbaddalada la soo jeediyay in lagu sameeyo siyaasadda isticmaalka xoogga SPD ee loogu talogalay in lagu habsado in xoog ku habboon loona baahan yahay in la isticmaalo si loo waafajiyo ujeedooyinka Dastuurka iyo sharciga.

Joojinta iyo Xanibaadda

Baahida loo qabo isbaddalka: Mid ka mid ah madax banaanida ugu muhiimsan, sida Dastuurka uu ballan qaaday, waa awoodda loo leeyahay in si madax banaan loo socdo iyo in aan qofka loo geysanin baaritaan iyo in aan lagala wareegin hantidiisa haddii aan loo baahneyn. Si loo habsado in ay jirto taageero xooggan iyo kalsoonida dadweynaa ku qabaan saraakiisha boliiska, waxaa muhiim ah in saraakiisha u qabsadaan shaqadooda eex la'aan iyo iyaga oo aan jebinin sharuudaha Dastuurka. Baaritaanka DOJ waxay lagu soo gabogabeysay in siyaasadaa iyo tababarka SPD ku guul dareysteen in ay sharaxaan marka sarkaalka uu sharci ahaan joojin karo, xannibi karo ama baari karo, iyadoo dadkii aan la xerin. DOJ waxay ogaatay in, mararka qaar, siyaasadahaan abuurtay halista in saraakiisha SPD si sharci darro ah dadka u joojiyaan una baaraan. Wareysiga Bulshada SPD 2011 (2011 SPD Community Survey) waxay soo sheegtay in boqolkiiba 46 dadka ka soo jawaabay ee daggan Seattle aaminsan yahiin in dhibaato lagu qabo sida SPD u joojiso dadka, la'aanta sabab wanaagsan.

Hawsha CPC: Talo ahaan in isbaddal lagu sameeyo siyaasadaha, tababarka iyo kormeerka sarkaalka, iyo aruurinta xogta, baarista iyo warbixinta si loo habsado in saraakiisha haystaan sabab wanaagsan ay ku joojiyaan kuna xanibaan qofka.

Duubidda Fiidiyowga Gudaha-Baabuurka

Baahida loo qabo isbaddalka: Mar kasta, si leysugu haleyn karo looma helin fiidiyowya laga duubay gudaha-baabuurka si loo xaqiijiyo ama naqdi looga sameeyo warbixinta qoran ee boliiska ama waxyaabaha ay arkaan marqaatiga ee ku saabsan dhacdooyinka leysku qabsado. Sidoo kale, mar kasta, si leysugu haleyn karo looma helin tababarka. Si leysugu haleyn karo looma helin fiidiyow taasoo ugu wacan isugeynta siyaasadaha waaxda iyo xadidaadda farsamada iyo taxadiga.

Hawsha CPC: Talo in isbaddal lagu sameeyo farsamada, siyaasadaha, tababarka iyo kormeerka sarkaalka, iyo aruurinta xogta iyo warbixinta la xariirta duubitaanka fiidiyowga gudaha baabuurka si loo habsado in duubitaanka loo sameeyo loona helo si nidaamsan. Helitaanka duubitaanka si loo fiirsado waxay xoojin doontaa ammaanka dadweynaha iyo la-xisaabtanka sarkaalka.

Iskaashatada Baddalaadda

CPS waxay aad ula shaqeysaa wakaalado kale si loo horumariyo isbaddal, si loo soo saaro talooyinka siyaasadda iyo si loo habsado la-xisaabtanka. Iskaashatada ugu muhiimsan waxaa ka mid ah SPD, wakaalado iyo waaxyo kale oo ka tirsan Magaalada Seattle, Kormeeraha Maxkamadda Magacaawda (Court Appointed Monitor) kaasoo kor ka fiiriya heshiiska laga gaaray go'aanka, iyo DOJ. CPS waa ka madax banaan tahay iskaashatada iyo waxay fikradaha bulshada gelin doontaa talooyinkeeda ugu dambeeyo ee ku saabsan siyaasadda.

Bulshada:

Guddiga Boliiska Bulshada

Magaalada Seattle/ Waaxda Boliiska Seattle

Kormeeraha Maxkamadda Federaalka (Federal Court Monitor)

Waaxda Caddaaladda Mareykanka

Guushena waxay ku xeran tahay bulshada

Bishii Oktoobar 2013, CPC waxay raadsan doontaa faalada dadweynaha ee loo adeegsan doono in lagu miiro iyo lagu hagaajiyo talooyinkeeda ugu dambeeyo ee ku saabsan siyaasadda. CPC waxay u baahan tahay kaalmadaada si loo abuuro bulsho xooggan, nabad qabta oo in badan isku xeran.

Sida looga qeybgalo:

Isku qor liiska emailadana, bogga internetka **OCPC@seattle.gov**.

Tag boggena internetka **www.seattle.gov/policecommission**:

- Waxaad macluumaad ka heli kartaa shirarka CPC, kuwaasoo u furan dadweynaha iyo qoraalada laga sameyay shirarka dib u fiirinta.
- Fiiri qoraalada ku saabsan isbaddalada siyaasadaha la soo jeediyay.
- Buuxi su'aalaha internetka ee ku saabsan sida loo hagaajiyo dhaqanka SPD iyo xariirka bulshada.
- Faalo ka bixi ama talooyin ka soo jeedi mowduucyada ama arrimaha loo baahan yahay in CPC fiiriso (ama waxaad faaladaada iyo talooyinka ku soo dirtaa boosatada PO Box 94749, Seattle, WA 98124-4749).

Nala soo xariir si aad u codsatid in wakiilada CPC la kulmaan kooxdaada, ama si aad u soo jeedisid fikrado oo ku saabsan sida wanaagsan ee aan ku gaari karno xubnaha bulshada (wac 206-233-2664 ama email u dir OCPC@seattle.gov).

In badan ka ogaaw:
www.seattle.gov/policecommission

Nala soo xariir:
Guddiga Boliiska Bulshada Seattle
OCPC@seattle.gov
206-233-2664

Talaabadaha xiga

CPC waxay bulshada iyo kuwa muhiimka ah ay iskaashiga la leedahay u gudbin doontaa draaftiga talooyinka ku saabsan siyaasadda bisha Oktoobar 2013. Talooyinka ugu dambeeyo ee CPC waxay tixgelin ku samayn doonaan fikradahaas la soo jeediyay. Warbixinta rasmiga ah ee CPC waxaa la rabaa in la soo gudbiyo bartamaha Nofeembar, bisha Diseembar CPC waxay warbixinteeda u soo bandhigi doontaa Duqa Magaalada, Guddiga Magaalada, iyo bulshada.